



Xaquuqda Guryaha Kiradooda la Kabo ee Dhibanayaasha Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah dhibku ka soo gaaro iyo galmada Xoogid ah

Subsidized Housing Rights for Victims of Domestic Violence and Sexual Assault

Dagaalka Qoyska Dhexdiisa ah ee Guryaha Kiradooda la Kabo Xaquuq ayey leeyihiin

Waxaa jira sharci dowlada dhexe leedahay oo la yiraa VAWA (Violence Against Women Act - Sharciga la Dagaalanka Dagaalka haweenka lagu Hayo). VAWA waxa ay ku caawin haddii adiga ama qof qoyskaaga ka mid ahi uu yahay dhibane loo gaystay:

- gacanqaad ku salaysan jinsi,
- gacanqaad qoyska dhexdiisa ah,
- khashkhashaad, ama
- fara-xummeyn galmo oo fal-dambi ah

iyo aad dalbato ama aad ku nooshahay:

- Guri Dowladeed
- Guri Kiradiisa la Kabo
- Barnaamijyada Warqada 8 (Section 8)
- Guryaha Miyiga ee Hay'ada USDA
- Guryaha Danyarta ee Canshuurta La Xisaabiyo Qaybta 42 (Section 42)

Sharcigu wuxuu yiraa barnaamji guryaha ahi kuuma diidi karo guri, ma joojin karo heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay ama kaama saari karo guri iyadoo sababtu tahay falal uu tacadi gaystahu gaystay ama weerarahu uu adiga ama qof qoyskaaga ka mid ah uu u geystay. Barnaamijyada guryahu waxaa la siiyey ilaa Juun 14, 2017 inay ku dajiyaan nidaam degdeg ku wareejin ah dhibanaayasha dagaal qoyska dhexdiisa ah dhib ka soo gaaray ama galmo xoogid ah loo geysto ee u baahan inay guuraan si ay amaan u helaan hadii guri kale la heli karo.

Waxa aad dooran kartaa inaad faraha ka qaado kaabidaadda guryaha ee dhanka kiradda aadna u guurto goob amaan ah. Waxaa aad joojin kartaa heshiiska (lease) guriga aad ku degan tahay adigoon faraha ka qaadayn xaquuqdaadda ay kuugu soo noqonayso lacagtii dabaajiga ahayd ee aad dhigay.



Dagaalka qoyska dhexdiisa ahi waxa uu noqon karaa dagaal adigu wax lagugu yeelo ama qof qoyskaaga ka tirsan, ama dhib uu kuu geysto qof aad is shukaansataan ama galmo xoogid ah. Waxaa dhici karta inay joojiyaan liiska tacadiyaha ama weeraraha oo adiga kaliya guriga lagaa kireeyo.

Sharcigan macnahiisu ma aha in hay'ada guryaha ama qolada guriga lahi aysan fulinayn xeerarka kale ee guryaha ama qodobada kale ee heshiiska liiska ku yaal. Guriga waa lagaaga saari karaa wax kale oo ah ku xadgudub xeerarka heshiiska liiska ku qoran.

Sidee ayaan ku ogaan karaa in sharciga VAWA uu i caawin karo?

Eeg santuukha ku haboon xaaladaadda.

Waxa aan raadinayaa guri	Haa	Maya
Waxa aan codsaday guri dowladeed, guri kiradiisa la kabo, Guryaha Dhulka Miyiga ah ee hay'ada USDA, Guryaha Danyarta ee Canshuurta la Xisaabiyo (Section 42) ama waxa aan leeyahay barnaamijka Warqada Qaybta 8 (Section 8).		
Codsigaaygii waa la diiday.		
Qof qoyskayga ka tirsan ayaa waxa uu ahaa dhibane dhib ka soo gaaray dagaal qoyska dhexdiisa ama galmo xoogid ah.		
Codsigaaygii waa la diiday waayo tacadi gaystaha tacadigiisa ama dagaalka weeraraha, khashkhashaadiisa ama falalkiisa galmo ee faraxummeyta ah ee uu u geystay aniga ama qof ka mid ah qoyska AMA iyadoo sababtu tahay wax dhacay waayo wax tacadi gaystahu/weerarahu uu geystay. (tusaale ahaan: Ma bixin karo kiradda waayo tacadi gaystaha ayaa iga xaday lacagtii)		

Haddii aad jawaabi karto “haa’ **dhamaan** oraahda ku jirta santuukhan, waxaa dhici karta inuu ku ilaalinayo sharciga la yiraa VAWA. Buuxi ogaysiiska ku lifaaqan warqadan xogta aruursan ah. U dhiib ogaysiiska maamulka guryaha, mulkiilaha ama ciddii kale ee leh guriga ka dibna u sheeg inuu ku ilaalinayo sharciga loo soo gaabiyo VAWA iyo waxa aad rabto. Hubi inaad saxiixdo warqadda aadna nuqul adigu naftaada ugala harto.

Waxaan jaa horey u ahay kireyste	Haa	Maya
Waxa aan ku noolahay guri dowladeed, guri kiradiisa la kabo, Guryaha Dhulka Miyiga ah ee hay'ada USDA, Guryaha Canshuurtu Dadka Yarta ah Kirada uga soo Noqoto (Section 42) ama waxa aan leeyahay barnaamijka Warqada Qaybta 8 (Section 8).		
Waxaa la ii soo diray biil ah khasaare uu geystay tacadiyahu ama weerarahu.		
Waxa aan helay ogaysiis ah ku xadgudub kiiska, ogaysiis joojin liiskayga ah ama warqado guri ka saarid ah.		
Qof qoyskayga ka tirsan ayaa waxa uu ahaa dhibane dhib ka soo gaaray dagaal qoyska dhexdiisa ama galmo xoogid ah.		
Waxaa la igu soo dalacay lacag, ama waxaa la iga joojiyey, ama la iga saaray gurigii iyadoo sababtu tahay tacadi gaystaha tacadigiisa ama dagaalka weeraraha, khashkhashaadiisa ama falalkiisa galmo ee faraxummeyta ah ee uu u geystay aniga ama qof ka mid ah qoyska AMA iyadoo sababtu tahay wax dhacay wax tacadi gaystahu/weerarahu uu geystay. (tusaale ahaan: Ma bixin karo kiradda waayo tacadi gaystaha ayaa iga xaday lacagtii)		
Waxa aan u baahnahay inaad u guuro guri kale oo kiradiisa la kabo si kolkaa dhibanaha qoyskayga ee dhibku ka soo gaaray dagaalka qoyska dhexdiisa ah ama galmo xoogista ah uu uga baxsado waxyeelida uu qarka u saaran yahay ee uga imaanaysa tacadiyaha ama weeraraha.		
Waxaa u baahnahay inaan u 'adeegsado' Warqada 8 (Section 8) meel cusub si aan u ilaaliyo amaanka dhibanaha qoyskayga ee dhibku ka soo gaaray dagaalka qoyska dhexdiisa ah ama galmo xoogista ah.		
Waxa aan u baahnahay in bixiyaha kabida kiradayda ama qolada gurigu ay ka saaraan tacadiyaha ama weeraraha liiska laakiin ay u ogolaadaan in adiga iyo qoyskaygu aan ku sii jirno liiska.		
Dakhligaygu hoos ayuu u dhacay dagaal qoyska dhexdiisa ah galmo xoogid ah awgeed, kolka waxa aan u baahanahay in kiradayda dib loogu xisaabiyo.		
Waxa aan doortay inaan faraha ka qaado kaabidaydii dhanka kiradda ahayd gabi ahaanba si aan ugu guuro goob amaan ah. Waxa aan doortay maalinta aad guurayo. Ma aanan faraha ka qaadin xaquuqdayda ay iigu soo noqonayso lacagtii dabaajiga ahayd ee aan dhigay.		

Haddii aad uga jawaabi karto “haa’ **mid**” ka mid ah oraahda ku jirta santuukhan, waxaa dhici karta inuu ku ilaalinayo sharciga la yiraa VAWA. Buuxi ogaysiiska ku lifaaqan warqadan xogta aruursan ah. U dhiib ogaysiiska maamulka guryaha, mulkiilaha ama ciddii kale ee leh guriga ka dibna u sheeg in uu ku ilaalinayo sharciga loo soo gaabiyo VAWA iyo waxa aad rabto. Hubi inaad saxiixdo warqadda aadna nuqul adigu naftaada ugala harto.

Hadii aadan amaan ahayn

- iyadoo sababtu tahay dagaal qoyska ah awgii la xiriir **Day One Services** (Qolada la yiraa Adeegyada Maalinta Koowaad).
Wac 1(866) 223 1111 ama dhambaal (text) u dir (612) 399 9995
Ama gal shabakada www.dayoneservices.org ama www.MNcasa.org.
- iyadoo sababtu tahay Galmo xoogid ah oo lagu geystay wac: 1(800) 656 4673.

Caawimaad Kale

Hadi aad u baahan tahay akhbaar kale, caawimaad dhanka sharciga ah si aad u hesho xaqqaaga uu dhigayo sharciga VAWA, ama lagugu yiri sharciga VAWA adiga kuma quseeyo wac, xafiiska adeegyada sharciyada ee 1-(877) 696-6529.

Ama ka eeg caawimaad barnaamijyadda kale ku jira barta:
www.lawhelpmn.org/so/providers-and-clinics.



Xog Urursan oo ku saabsan macluumaadka sharciga MA AHA talo xagga sharciga. La tasho qareen. Ha isticmaalaan xogtan urursan haddi ay 1 sano ka soo wareegtay xilligii la daabacay. Weydiiso xogtii ugu dambaysay, liiska xogta urursan, ama aad ku hesho habab kale.

© 2025 Minnesota Legal Services Coalition. Qoraalkan waa la sii badin karaa waxaana loo adeegsan karaa oo kaliya hab shaqsi ah iyo waxbarasho kaliya. Xuquuqda kale waa mid la dhawray. Ogeysiiskan waa inuu la socdaa nuqul kasta oo la sii daabaco. Dib u daabicidda, sii qeybinta, iyo in loo isticmaalo hab ganacsi ah waa mid si adag loo mamnuucay.

VAWA Notice
(Ogaysiiska VAWA)

KU: **Housing Authority/Section 8 Program/Landlord**
KU SOCOTA: Hay'ada Guryaha/Barnaamijka Warqada 8 (Section 8)/Qolada Guryaha

KA: **Name:** _____
KA TIMI: Magaca

Address: _____
Ciwaanka

DATE *(Taariikhda):* _____

I am, or my household member is, a victim of domestic violence, dating violence, stalking or sexual assault. The Violence Against Women Act (VAWA), Pub. L. 117-103, Division W, 136 Stat. 49 (VAWA 2022), (March 15, 2022), applies to me.

Anigu waxa aan ahay, ama xubin qoyskayga ka mid ahi waxa ay tahay dhibane dhib ku soo gaaray dagaal qoyska dhexdiisa ah, dagaalka shukaansiga ka dhasha, dabagalid, ama galmo xoogid ah. Sharciga Dib u Ogolaanta la Dagaalanka Dagaalka Haweenka lagu Hayo (VAWA) Pub. L. 117-103, Division W, 136 Stat. 49 (VAWA 2022), (March 15, 2022), waa i quseeyaa aniga.

I cannot *(Ma dhici karto)*

- ☐ have my housing application denied for reasons related to the abuse or assault
In codsigayga guryaha loo diido sababo la xiriira tacadi iyo gacanqaad
- ☐ be evicted for not paying for damage caused by an abuser
in la iiga saari karo guriga bixin la'aanta kharashka waxyeelo uu gaystay tacadi gaystahu
- ☐ have my lease terminated for reasons related to the abuse or assault
in loo joojiyo liiskayga sababo la diido sababo la xiriira tacadi iyo gacanqaad
- ☐ be evicted for reasons related to the abuse or assault
in la iiga saari karo guriga sababo la diido sababo la xiriira tacadi iyo gacanqaad
- ☐ be treated differently than others based on the abuse or assault
Waxaa la iila dhaqmay si ka duwan dadka kale iyadoo ay taasi ku salaysan tahay tacadiga iyo gacanqaadka

The reasons for your actions against me are the result of the domestic violence, dating violence, stalking or sexual assault that has happened to me or my household member.

Sababaha falalkaaga aniga iga dhanka ah waxaa kalifay dagaal qoyska dhexdiisa ah, dagaalka shukaansiga ka dhashay, dabagalid, ama galmo xoogid ah aniga ama qof xubin ka ah qoyskayga ku dhacay

Please, apply my VAWA rights *(Fadlan, tixraac xaquuqdayda VAWA ay aniga i siinayso kolka):*

- ☐ when reviewing my application
aad dib u eegayso codsigayga
- ☐ when reviewing an alleged lease violation
kolka aad dib u eegayso liis jabinta la sheegtay
- ☐ and take the bill for damages caused by abuser or attacker off my account
kana saar lacagta khasaaraha uu kalifay tacadiyahu ama weerarahu xisaabtayda
- ☐ and take my abuser or attacker off my lease and make a new lease agreement with me
kana saar tacadiyaha ama weeraraha liiskayga sameeyna heshiis liis oo cusub oo aniga leeyahay

- ☐ when considering termination of my lease
kolka aad tixgelinayso joojinta liiskayga
- ☐ when considering evicting me
kolka aad tixgelinayso guri inaad iga saarto
- ☐ and transfer me to another subsidized unit
oo aad bedesho guri kale oo kiradiisa la kabo
- ☐ and give me new Section 8 Voucher papers to move
aadna I siiso Warqad 8 (Section 8) oo cusub si aan u guuro
- ☐ and give me new Section 8 Voucher papers to port my Voucher out of your program to a new location
aadna I siiso Warqad 8 (Section 8) oo cusub si aan uga la baxo warqadayda barnaamijkaaga aan u gashado meel cusub
- ☐ and recalculate my rent immediately because my income decreased due to domestic violence or sexual assault.
aadna dib degdeg ugu xisaabiso kiradayda waayo dakhigaygii ayaa hoos u dhacay dagaalka qoyska dhexdiisa ka dhacay ama galmada xoogid ah awgii
- ☐ to (other) _____
ku (kale)

Please contact me for information that you need in order to provide me with my VAWA rights.

Fadlan ila soo xiriir si aad iigala hesho wixii akhbaar ah ee aad u baahan si aad ii siiso xaquuqdayda uu dhigayo sharciga VAWA

Please do not give out the information in this notice to anyone, especially my abuser, without my written permission.

Fadlan ha siin akhbaarta ogaysiiskan cid kale, gaar ahaan tacadiyahayga, la'aanta ogolaanshahayga oo qoran

(Signature) *(saxiix)*

(keep a copy of this notice for your own records)

(Kala har nuqul ogaysiiskan si aad u haysato)